

Ogeysiinta macaamilka 18.3.2021

Isdiwaangelinta waxqabadka jardiinooyinka ciyaarta ee dugsileyada ayaa billaabana

Waxqabadka jardiinooyinka ciyaarta Helsinki ee dugsileyda waxay carruurtu ku helayaan fursadaha dheesha, dhaqdhaqaaqa, ciyaaraha la hago iyo aadista bannaanka iyo weliba la kulanka asxaabta iyo nasasho.

Waxqabadka la hago ee maalinlaha aha waxaa lagu qabanqaabiyaa gudaha iyo bannaanka. Waxqabadku waa mid noocyo badan oo ku salaysan dheesha, dhaqdhaqaaqa, farshaxanka iyo dhaxalka dhaqanka ee cunugga wuxuuna sidoo kale suuraggeliyaa waayo-aragnimo wanaagsan oo dhinaca waxbarashada ah. Carruurtu waa kuwa jardiinada ciyaarta ku ah hawlwadeenno firfircoon; qorshaha iyo hirgelinta waxqabadku waxay ka dhashaan rajooyinka iyo baahiyaha carruurta.

Isdiwaangelinta waxqabadka deyrta 2021 ee lacag la'aanta ah ee jardiinooyinka ciyaarta ee dugsileydu wuxuu billaabanaayaa 22.3.2021. Waxqabadka jardiinada ciyaarta ee dugsileyda waxaa la iska diiwaangelin kartaa xilliga waxqabadka oo dhan. Waxaa la iska diiwaangeli karaa cuntada fudud ee joogta 36,10 €/bishi ee jardiinada ciyaarta ama cunuggu wuxuu soo qaadan karaa cuntadiisa. Lacagta cuntada fudud waxaa loo codsan karaa lacag ka dhaafid.

Cunugga wuxuu waxqabadka ka qaybqaadan karaa maalin kasta ama si aan joogto ahayn. Waalidka ayaa jardiinada ciyaarta ku soo wargelinaya maalmaha maqnaanshaha, wakhtiga aadista guriga ee cunugga iyo macluumaadka ku saabsan in cunuggu uu kaligiis guriga aadi karo. Haddii aanu cunuggu imaan jardiinada ciyaarta wakhtigi lagu heshiiyay ama uu wargelin la'aan ka baxo wakhtiga shaqada, waxaan ogeysiinaynaa waalidka. Hagaayaasha jooga jardiinada ciyaarta ayaa ku dadaalaya ammaanka bey'ada waxqabadka ee caruurta.

Waxqabadka maalinlaha ah wuxuu billaabanaayaa marka ay hawsha dugsiga ee cunuggu dhammaato iyo waxayna dhammaanaysaa 16 saac ama 16.30 saac. Jardiinooyinka ciyaarta waxaa laga helaa ciwaanka www.hel.fi/leikkipuistot. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan iska diiwaangelinta waxqabadka jardiinooyinka ee dugsileyada hel.fi/leikkipuistot/koululaiset

Macluumaadka ku saabsan goobaha waxqabadka jardiinooyinka ciyaarta ee sannad-dugsiiyeedka 2021-2022 waxaa waalidka boostada loogu dirayaa ugu dambayn 4.6.2021.



Jardiinooyinka ciyaarta ee kala ah Etupelto, Ida, Kotinummi, Puuskakulma, Tervapääsky, Vallila iyo Vähätupa waxaa lagu qabanqaabinayaa waxqabadka galabti ee dugsileyda oo waafaqsan sharciga waxbarashada aaasaasiga ah. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan codsashada jardiinooyinka www.hel.fi/iltapaivatoiminta